

## Ka caawinta ilmahaaga waxbarashada

### Hagida loogu talagalay waalidiinta ardayda ee Ingiriisiga u isticmaala Luuqad Dheeraad ah oo ah (EAL)

#### Waa maxay sababta aad u akhrinayso qoraalkaan?

Halkaan waxaad ka heli kartaa fikrado wax ku ool ah oo ku saabsan:

1. Ku lug lahaanshaha nolosha dugsiga
2. Ka caawinta ilmahaaga inuu wax barto

#### 1. Ku lug lahaanshaha nolosha dugsiga

Iskuulada ku yaal Boqortooyada Ingiriiska waxay waalidiinta uga baahan yihiin inay si firfircoon uga qayb qaataan nolosha dugsiga waxayna kaa caawin doonaan inaad ka qeybqaadato haddii aadan ku kalsoonayn Ingiriiskaaga ama aad ku howlan tahay shaqo.

##### Halkaan waxaa ku yaal fikrado kaa caawin kara inaad:

- U sheeg dugsiga haddii aad dhib kala kulanto qoraallada qaarkood tusaale ahaan waraaqaha dugsiga ama webseetka dugsiga
- U sheeg shaqaalaha dugsiga haddii ay si dhakhso ah kuula hadlayaan ama ay isticmaalayaan ereyo aadan aqoon. Halkan waxaa ku qoran qaar ka mid ah jumladaha anshaxaysan oo aad u isticmaali karto arintaan:
  - *Could you speak more slowly, please? (Si tartiib ah ma u hadli kartaa, fadlan?)*
  - *Could you say that again? I didn't understand. (Maku soo celin kartaa midaas mar labaad? Ma fahmin.)*
  - *I'm sorry, but I didn't understand you. Could you please repeat that? (Waan ka xumahay, kuma fahmin. Fadlan maku soo celin kartaa midaas?)*
  - *Could you please tell me what \_\_\_\_\_ means? (Fadlan ma ii sheegi kartaa waxa \_\_\_\_\_ loola jeedo?)*
  - *Could you repeat that word, please? I don't know what it means. (Maku soo celin kartaa ereygaas, fadlan? Ma aqaan waxa loola jeedo.)*
  - *Could you speak louder, please? I cannot hear what you said. (Si cod dheer ma u hadli kartaa, fadlan? Ma maqli karo waxa aad sheegayso.)*



- U sheeg dugsiga waxa kaa caawin doona inaad si fiican u fahamto isgaadhsiinta/xiriirada dugsiga tusaale ahaan tarjumaadda waxyaabaha laga wada hadlay



- U sheeg iskuulka goorta ay tahay **wakhtiga** ugu fiican ee lagula soo xiriiri karo, iyo **lambarka** ugu fiican ee lagaala soo xiriir karo



- U sheeg dugsiga haddii uu jiro xubin kale oo qoyska ka tirsan oo ku fiican luuqada Ingiriisiga oo kaa caawin kara la xiriiritaanka dugsiga

- Weydii dugsiya macluumaadka ku saabsan dugsiya iyo waxbarashada ilmahaaga. Weydiiso in macluumaadkaan laguugu tarjumo luuqaddaada hooyo. Waa inaad wax ka weydiisaa:



Jadwalka iskuulka



Shaqada guriga ee ilmahaaga



Imtixaanada iyo tijaabooyinka (kuwaani waxaa mararka qaarkood loo yaqaanaa 'qiimeyn')



Xaadiritaanka



Manhajka iyo Marxaladaha Muhiimka ah

- Ku biir kooxaha waalidiinta ee ay ku jiraan waaliddiinta kale ee ku hadla isla luqaddaada. Haddii dugsiya uusan lahayn koox, weydii in ay mid bilaabaan/aasaasan.

- Ka qaybgal kulamada waalidiinta. Haddii aad ka walwalsan tahay luuqadaada Ingiriisiga, waxaad codsan kartaa inaad kulan qof-ka-qof ah la yeelato macallin si aad ugala hadasho horumarka ilmahaaga. Waxaad sidoo kale ka codsan kartaa dugsiya haddii turjubaan ay heli karaan si uu kuu caawiyo.

## 2.Sida aad gacan uga geysan kartid waxbarashada ilmahaaga

Iskuulada ku yaal Boqortooyada Ingiriiska waxay ka filayaan carruurta inay sameeyaan shaqada guriga ee iskuulka looga soo dhiibo iyo in waalidiinta ay ka caawiyaan oo ay ku dhiiri geliyaan waxbarashada guriga.

### Halkaan waxaa ku yaal qaar ka mid ah fikradaha ku saabsan sida aad uga caawin karto ilmahaaga inuu wax barto:

- Weydii dugsiya ilmahaaga 'siyaasadooda shaqada-guriga' si aad u ogaato waxa dugsiya filanaayo, kadibna waxaad ilmahaaga ku caawin kartaa shaqadooda guriga
- Si aad carruurta uga caawiso shaqada guriga:
  - Weydii su'aalo oo ka hadal mawduucyada la soo baray adigoo isticmaalaya luuqaddaada hooyo
  - Ku dhiirigali ilmahaaga inuu isticmaalo qaamuus laba luuqadoodle ah si uu ereyada u tarjumo
  - Ku dhiirrigeli ilmahaaga inuu qoro wixii ereyo cusub ah oo luuqada Ingiriiska ah iyo/ama luuqadooda koowaad ah si ay uga caawiso inay xusuustaan
  - Ku dhiirigeli ilmahaaga inay su'aal weydiyaan macallimiintooda haddii aysan wax fahmin
- Ilmahaaga wax la akhri marka ay joogan guriga. Waxaad arrintaan sameyn kartaa adigoo isticmaalaya luuqaddaada koowaad oo kala hadal sawirrada iyo waxa ka dhacaya sheekada. Carruurta waaweyn, waxaad dhageysan kartaa iyadoo wax akhriyaaya waxaadna weydiin kartaa inay qiyaasaan ereyo haddii aysan garaneyn waxa loo jeedo. Webseetyadaan waxay leeyihiin sheekooyin fara badan oo luuqado kala duwan ah, waana bilaash: **World Stories** iyo **Unite for Literacy**.
- Ku biir fasal kaa caawinaya inaad kobciso Ingiriisigaaga. Iskuulada qaarkood waxay leeyihiin fasalo Ingiriis lagu baro oo loogu talagalay waalidiinta sidaa darteed weydii haddii la heli karo. Waxaad sidoo kale fasalo ESOL ka heli kartaa Kuleejka Waxbarashada Dheeraadka ah ee deegaankaaga. Haddii aadan ku biiri karin fasal, ama aad dooneysid inaad si madaxbanaan wax u baratid, waxaad ku tababarashada luuqadda Ingiriiska oo bilaash ah ka heli kartaa **Golaha British**.

The Bell Foundation  
Hillscross  
Red Cross Lane  
Cambridge  
CB2 0QU

[www.bell-foundation.org.uk](http://www.bell-foundation.org.uk)

### Xuquuda Daabacaada

Dhamaan xuquuqaha daabacaada waa la ilaaliyey. Qayb ka mid ah qoraalkaan looma daabacan karo qaab kasta (oo ay ku jiraan koobi ka qaadista ama meel ku kaydin iyadoo la isticmaalayo qaab elektoroonig ah ama in si kumeelgaar ah ama aan kas ah loo isticmaalo daabacaadan) iyada oo aan fasax qoraal ah laga helin mulkiilaha xuquuqda daabacadda. Codsiyada lagu raadinaayo oggolaanshaha qoran ee xuquuqda daabacadda mulkiilaha si koobi looga soo saaro qeyb ka mid ah daabacaadan, waa in loo diraa daabacaha.

Xuquuqda daabacaadda © Bell Educational Trust Limited (oo u shaqeyneysa The Bell Foundation ahaan)

The Bell Educational Trust Limited waa shirkad samafal oo lambarka dammaanadeedu yahay 1048465, oo la aasaasay 5 Abriil 1972, iyo hay'ad samafal ahaan uga diiwaangashan Guddiga Samafalka, lambarka keeduna yahay 311585